JamhuuriyadaFederalkaSoomaaliya

**DowladGoboleedkaHirshabeelle**
**XafiiskaMadaxweynaha**

**Federal Republic of Somalia**
**Hirshabelle State**
**Office of the President**

**Ref: DGHSH/XMM/N/0121/18** **Tr: 19/03/2018**

**XEER MADAXWEYNE Lr 121**

Madaxweynaha Dowlad goboleedka hirshabeele markii uu arkay qodobka 51aad farqadiisa 12aad ee dastuurka dowlad goboleedka Hirshabeele.

Markii uu arkay baahida loo qabo in la helo sharciyo iyo xeerar lagu Maareeyo Maaliyadda Dadweynaha, xeer daqli iyo xeernidaamiyeyaashiisa, iyo in la helo xeer lagu dhiso Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowlad goboleedka Hirshabeele.

Markii uu arkay qaraarka baarlamaanka uu soo saaray 18/02/2018 ee uu tirsigiisa yahay **GSHDDGHSH/003/18** ee ku aadaanaa ansixinta sharciga Dakhliga iyo xeernidaamiyeyaasha 9aad 2018 iyo kan kale ee la soo saaray isla taariikhdaas ee uu tirsagiisa yahay **GSHDDGHSH/004/18** ee ku aadan ansixinta sharciga lagu dhisayo wasaaradda maaliyadda 2018 iyo sharciga kale ee lagu ansixiyey sharciga maareynta Maaliyadda Dadweynaha 2018 oo isna tirsigiisa yahay **GSHDDGHSH/005/18** ee la soo saaray taariikh 05/03/2018.

Madaxweynaha dowlad goboleedka hirshabeele waxa uu xeeriyey in qaraarada baarlamaanka ee

1. Sharciga Dakhliga Iyo Xeernidaamiyeyaasha 9aad 2018
2. Sharciga Lagu Dhisayo Wasaaradda Maaliyadda 2018
3. Sharciga Maareynta Maaliyadda Dadweynaha 2018

loo bedelo xeer madaxweyne maanta oo ay taariikhda tahay 19/03/2018
xeer lamber 121

Maxamed Cabdi Waare
Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeele

Jowhar, Hirshabelle State of Somalia. Tel+252616652530 Email: president@hirshabelle.gov.so

Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Hirshabelle
Xafiiska Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad Goboledka Hirshabeelle

جمهورية الصومال الفيدرالية
ولاية اقليم هرشبيلي
مكتب رئيس مجلس االنواب هرشبيلي

Federal Republic of Somalia
Hirshabelle State
Office of the speaker

Ref: XGBDGHSH / 120/18: الرقم

Jowhar, 05th March 2018 التاريخ

**Ku: Madaxweynaha Dowlad Goboledka Hirshabelle** =Jowhar=

**OG: Madaxweyne Kuxigenka Dowlad Goboledka Hirshabelle** =Jowhar=

**OG: Wasiirka Maaliyada Dowlad Goboledka Hirshabelle** =Jowhar=

**OG:Guddiga Maaliyada Qorsheynta iyo tirakoobka BDGHSH** =Jowhar=

**OG:Xoghayaha Guud ee Golaha Sharci Dejeinta Hirshabelle** =Jowhar=

**Ujeedo ;-Qaraarka Baarlamanka ee Anxisinta Sharciga lagu Dhisayo Wasarada Maaliyada 2018**

**Mudane Madaxweyne**

Waxaan halkaan kugu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Sharci Dejinta **Lr. GSHDDGHSH/004/18** ee **18-02-2018** oo Golaha Sharci Dejinta Dowlad Goboledka Hirshabelle go'aan kagaaray **Ansixinta Sharciga lagu dhisayo Wasaarada Maaliyada 2018** oo halkaan ku lifaaqan isagoo Go'aamiyey qodobada Soo Socda

**Qodobka 1aad**

Ayadoo ay Goob joog yihiin Golaha **52** Xildhibaan Kalfadhigii 3aad fadhigiisa 11-aad ee 18-02-2018 wuxuu codeyn wadar oggol ah ku ansixiyey **Sharciga lagu dhisayo Wasaarada Maaliyada 2018** si ay u fududaato Qorshe Hawleedka Xukuumada ee ku aadan Wasaaradan

**Qodobka 2aad**

Hadaba Waxaan Mudane Madaxweyne Kugu wargelinayaa inaad Xeer Madaxweyne kusoo saarto **Sharciga lagu dhisayo Wasarada Maaliyada ee la ansixiyey sanadka 2018** Si Waafaqsan qodobka 51aad Faqrada 12aad Dastuurka DGHSH Laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dowlad Goboledka Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 43aad Faqrada 1aad si uu u noqoto Sharci dhaqan gal ah

**Sheikh Osman Barre Mohamed**

**Gudomiyaha Golaha Sharci Dejinta Dowlada Goboleedka Hirshabelle**

E-mail: office.speaker@hirshabellestate.so | Mobile: +252615564141, +252615611016

# Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya

**Xeerka Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha**

**Dowlad-goboleedka Hirshabeelle**
**Soomaaliya**

**2018**

**Xeer Lagu Dhisayo Wasaaradda Maaliyadda iyo Hay'adda Canshuur-Ururinta iyo Arrimo Kale oo La Xiriira**

**DOWLAD-GOBOLEEDKA HIRSHABEELLE EE SOOMAALIYA**

## QAABKA AY U HABEYSAN YIHIIN QODOBBADA


*MADAXA I: QODOBBO HORDHAC AH* ..... 2

Qodobka 1aad. Magaca oo Gaaban ..... 2

Qodobka 2aad. Hadafka laga leeyahay Xeerka ..... 2

Qodobka 3aad. Fasiraadda ..... 2

*MADAXA II: WASAARADDA MAALIYADDA IYO HAY'ADDA DAKHLI-URURINTA IYO ARRIMO KALE OO LA HALMAALA* ..... 4

Qodobka 4aad. Wasaaradda Maaliyadda ..... 4

Qodobka 5aad. Hawlaheeda ..... 4

Qodobka 6aad. Wasiirka Maaliyadda ..... 6

Qodobka 7aad. Xisaabaadka Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ..... 6

Qodobka 8. Hantidhowr Madax-bannaan ..... 6

Qodobka 9aad. Siyaasadda Shaqaalaha iyo Shaqaaleynta ..... 6

Qodobka 10aad. Hirgelinta ..... 7

Qodobka 11aad. Dhaqangalka ..... 7

# MADAXA I: QODOBBO HORDHAC AH

### Qodobka 1aad. Magaca oo Gaaban

Xeerkan waxaa loogu yeeri karaa Xeerka Dhisidda Wasaaradda Maaliyadda iyo Hay'adda Dakhli-ururinta ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

### Qodobka 2aad. Hadafka laga leeyahay Xeerka

Hadafka laga leeyahay Xeerkan waa in:

a) lagu dhiso Wasaaradda Maaliyadda iyo Hay'adda Canshuur-Ururinta ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya

b) lagu hubiyo in Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ay leedahay Wasaarad Maaliyadeed oo mas'uul ka ah guud ahaan maamulka iyo maareynta Miisaaniyadda iyo arrimaha kale ee maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya iyo miisaaniyadaha ay mas'uulka ka yihiin gobollada, kuwaas oo isku noqonaya Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

c) lagu hubiyo in Wasaaradda Maaliyadda ay lahaato Hay'ad Dakhli-ururin oo haysata shaqaale ku filan, oo si habeysan loo maamulo, loona awood-siiyey ururinta dhammaan canshuuraha iyo dakhliyada kale ee uu sharcigu qeexayo ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ayna dhammaan dakhliyadaas ku shubto xisaabta Miisaaniyadda Mideysan (Xisaabta Keliya ee Khasnadda);

### Qodobka 3aad. Fasiraadda

(1) Xeerkan dhexdiisa, haddii aaney xaaladda si kale u sheegin, fasiraadahan soo socda ayaa la raacayaa:

*"Cutubka Diyaarinta Miisaaniyadda/Budget Preparation Module (BPM)"* waxaa loola jeedaa hannaanka taageera is-wadidda (*automation*) iyo isku-dhafidda geeddi-socodka diyaarinta miisaaniyadda;

*"Sanduuqa Maaliyadda Mideysan"* waxaa loola jeedaa sanduuqa mideynaya dhammaan dakhliga dowladeed ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, oo loo isticmaalo bixinta lacagaha, sida ku qeexan Xeerka Maareynta Maaliyadda ee Baarlamaanka;

*"Hannaanka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda/Financial Management Information System (FMIS)"* waxaa loola jeedaa hannaanka taageera is-wadidda (*automation*) iyo isku-dhafidda geeddi-socodyada maareynta maaliyadda dadweynaha/maamulka oo ay ka mid yihiin sameynta, fulinta miisaaniyadda (t.a. xakameynta ballanqaadka, maareynta kaashka/amaahda, hawlgallada khasnadda), xisaabaadka, iyo ka-warbixinta.

*"Sanad-maaliyadeed"* waxaa loola jeedaa muddo toban iyo laba bilood oo is xigxiga ah oo qiyaasaha miisaaniyadda iyo hawlgalladeeda la diiwaangelinayo, lagu xisaabtamayo lagana warbixinayo; waxaa uu bilowdaa maalinta koowaad ee bisha Jannaayo waxaana uu dhammaadaa maalinta 31aad ee bisha Disembar ee sanadka;

*"Deegaan Tiknolojiyadda Macluumaadka iyo Isgaarsiinta/Information and Communication Technology (ICT) environment"* waxaa loola jeedaa isgaarsiinta mideysan iyo war-isgaarsiinta iskudhafan (*unified communications and integration of telecommunications* (khadadka telefoonnada iyo isgaarsiin aan khadadka ku shaqeyn), kombuyutarrada iyo sidoo kale barnaamijyada kombuyutarrada ku shaqeeyaan (*software)* ee loo baahan yahay, kuwa iskuxira (*middleware),* keydka, iyo nidaamyada maqal-muuqaalka, oo adeegsadayaasha awood u siiya in ay galaan, keydiyaan, gudbiyaan, ayna maamulaan macluumaad.

*"Tilmaammo/amarro"* waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo

"*Hantidhowrka Gudaha"* waxaa loola jeedaa waxqabad madax-bannaan, hubin iyo la-talin quman oo loo qaabeeyey in ay qiimo u kordhiso ayna sii wanaajiso hawlgallada dowladda. Waxaa uu gacan ka geystaa in dowladdu ay xaqiijiso ujeeddooyinkeeda iyada oo keeneysa hab nidaamsan, anshax ku dhisan oo loo qiimeeyo loona sii wanaajiyo taabogalnimada geeddi-socodyada maareynta, kantaroolidda iyo maamulidda halista

"*Wasaarado Kale*" waxaa loola jeedaa dhammaan Wasaaradaha kale ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya marka laga soo reebo Wasaaradda Maaliyadda.

"*Wasiirka"* waxaa loola jeedaa Wasiirka Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

"*Wasaaradda*" waxaa loola jeedaa Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya

"*Miisaaniyad* Mideysan" waxaa loola jeedaa Miisaaniyadda ay ansaxisey Sharci-dejinta iyada oo ah Xeer Baarlamaan oo loo sameeyey sanad-maaliyadeed gaar ah.

*"Baarlamaanka"* waxaa loola jeedaa laanta sharci-dejinta, oo ah laanta la soo doorto ee dowladda ee mas'uuliyaddeedu tahay in ay matasho dadka soo doortey, sameynta sharciyada iyo kormeerka hawlaha dowladda iyada oo u mareysa dhegeysiyo iyo baaritaanno.

*"Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha "*: waxaa loola jeedaa nidaamyada iyo geeddi-socodyada sharci iyo maamul ee hubinaya in si hufan, dhaqaaleysan oo wax soo saar leh oo kheyraadka dadweynaha/maamulka loogu adeegsado si waafaqsan jaangooyooyinkii hore loo qeexay

*Maaliyad/Lacag Dadweyne/Maamul"* waxaa uu macnaheedu yahay kheyraadka maaliyadeed ee Dowlad-goboleed ee lagu qeexay Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha/Maamulka ee Baarlamaanka

*"Kheyraad Dadweyne/Maamul"* waxaa loola jeedaa dakhliga maamulka/dowladda oo ay ka mid yihiin kuwa lagu heley deeq, waqaf, amaah, hantida guurtada ah iyo tan ma guurtada ah, lacag deebaaji/*deposit* ah, lacago ay tahay in la helo iyo xuquuqo maqan, maalgelin iyo guud ahaan hantida noocyadeeda kala duwan

*"Xeer-nidaamiye"* waxaa loola jeedaa xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Wasiirka Maaliyadda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerkan. Xeer-nidaamiyeyaashan waa waajib in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka.

*"Hanaanka Maareynta Dakhliga"* waxaa loola jeedaa hannaan taageera is-wadidda *(automation)* iyo isku-dhafidda geeddi-socodyada maareynta dakhliga dowladda, oo ay ku jiraan, laakiin aaney ku xaddidneyn keliya dakhli ururinta, saadaalinta/oddoroska salka dakhliga canshuur-bixiyeyaasha, diiwaangelinta canshuur-bixiyeyaasha, xisaabaadka iyo warbixinta.

*"Xisaabta Mideysan ee Dowladda/Treasury Single Account (TSA)"* waxaa uu macnaheedu yahay qaab-dhismeed mideysan oo ay u sameysan yihiin xisaabaadka banki ee dowladda ee muuqaal mideysan siinaya lacagaha kaashka ah ee dowladda. Iyada oo ku saleysan mabda'a mid ahaanshaha lacagta kaashka ah iyo mid ahaanshaha khasnadda, TSA waa xisaab banki ama tiro xisaabo banki oo isku xiran oo ay dowladdu ku gudbiso kuna hesho dhammaan lacagaha ay hesho iyo kuwa ay bixiso.

## MADAXA II: WASAARADDA MAALIYADDA IYO HAY'ADDA DAKHLI-URURINTA IYO ARRIMO KALE OO LA HALMAALA

### Qodobka 4aad. Wasaaradda Maaliyadda

Wasaaradda Maaliyadda, ee lagu dhisey awoodda Dowlad-goboleedka ka tirsan Federaalka [Baarlamaanka], waxaa ay mas'uul ka tahay guud ahaan maamulka iyo maareynta maaliyadeed ee Miisaaniyadda iyo arrimaha kale ee maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya iyo miisaaniyadaha ay mas'uulka ka yihiin gobollada, kuwaas oo isku noqonaya Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

### Qodobka 5aad. Hawlaheeda

**5.1 Wasaaradda Maaliyadda, oo la tashaneysa hay'adaha Dowladda Federaalka ee u xilsaaran iyo maamullada gobollada ee kharash-gareynaya miisaaniyadda, waa in ay [Baarlamaanka] u gudbisaa taloooyin la xiriira Wasaaradda Maaliyadda oo ku saabsan:**

a) Dejinta istiraatiijiyadda guud ee maaliyadeed ee Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, taas oo ku xisaabtameysa xaaladaha guud ee dhaqaalaha iyo saameynta siyaasad maaliyadeed ay ku yeelan karto xaaladaha dhaqaalaha;

b) Dejinta barnaamijka dakhliga iyo kharashaadka Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya iyo dejinta qorsheyaasha lagu kantaroolayo laguna fulinayo kharashaadka hoos imaanaya barnaamijka dakhliga iyo kharash-gareynta;

c) Abuurista iyo maareynta Cutubka Diyaarinta Maaliyadda si loogu diyaariyo miisaaniyadda looguna soo bandhigo Jadwallada Qoondeynta;

d) Dejinta siyaasadaha dakhli-ururinta iyo dakhli wada-qaybsashada Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya hadba sida loogu baahdo;

e) Xakameynta iyo fulinta dakhli-ururinta iyo kharashaadka ku hoos jira Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya;

f) Sameynta habab hanti-dhowrka gudaha ah oo u habboon Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya;

g) sameynta iyo maareynta hannaan macluumaadka maareynta maaliyadeed si loogu xakameeyo (kantaroolo) loogagana warbixiyo dakhliga iyo kharashaadka; iyo,

h) Ilaalinta lacagta kaashka ah iyo maareynta xisaabaadka bankiyada ee Sanduuqa Maaliyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

**5.2 Wasaaradda Maaliyadda, oo la tashaneysa hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya ee u xilsaaran iyo maamullada kharash-gareynaya ee gobollada, waa in ay [Baarlamaanka] u gudbisaa talooyin ku saabsan Hay'adda Dakhli-ururinta kuwaas oo la xiriira;**

a) Sameynta iyo gacan-ku-haynta diiwaan lagu qoro canshuur-bixiyeyaasha ama kuwa ay suuragal tahay in ay canshuur-bixiyaan, iyada oo canshuur-bixiyeyaasha siineysa shahaadooyinka diiwaangelinta iyo lambar aqoonsi oo u gaar ah canshuur-bixiye kasta;

b) Sameynta iyo gacan-ku-haynta Hannaan Maareyn Dakhli oo la geliyo dakhliga la helo laguna qoro canshuuraha la bixiyo loogana shaqeeyo canshuur-celinta;

c) In ay dowladaha hoose kala heshiiso qabashada hawlaha dakhli-ururinta iyada oo mataleysa iyaga.

d) In ay hay'ado kale (cid saddexaad) kala heshiiso in ay ururiyaan dakhli iyo in ay qabtaan hawlo maamul iyaga oo ka wakiil ah Hay'adda Dakhli-ururinta (*Revenue Collection Authority*).

**5.3 Wasaaradda Maaliyadda waa in ay:**

a) Dejisaa Miisaaniyadda Guud ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ayna miisaaniyadda u soo bandhigtaa Golaha Wasiiradda iyo Baarlamaanka si uu u ansixiyo uuna ugu hirgeliyo oo uu [Xeer Baarlamaan] ku oggolaado Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya;

b) Hubisaa in miisaaniyadaha gobollada loo dejiyey, loona ansaxiyey, ay qayb ka yihiin miisaaniyadda wasaaradda Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ee kormeereysa ayna [gobollada] u fuliyaan si waafaqsan xaaladda dhaqaalaha guud iyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya;

c) Ururiso (diiwaangaliso) ayna [Baarlamaanka] u bandhigto dakhliga iyo kharashaadka Miisaaniyadda Guud ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya;

d) Ka shaqayso sidii ay u abuuri lahayd jawi sahlaya in la sameeyo nidaam casri ah (tiknoolojiyad) dhibyaraynaysa ururinta iyo maareynta xogta iyo hawlaha maaliyadeed. iyo

e) In ay qabato shaqooyinka kale ee lagamamaarmaanka u ah hirgelinta hawlahan kor lagu soo xusey.

**Qodobka 6aad. Wasiirka Maaliyadda**

6.1 Madaxweynaha Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waxaa uu magacaabayaa Wasiir Maaliyadeed isaga oo ah sarkaalka ugu sarreeya ee fulinta, mas'uuliyaddiisu noqoneyso maareynta Wasaaradda Maaliyadda iyo Hay'adda Dakhli-ururinta iyo hubinta meelmarinta dhammaan hawlihii loo igmadey hay'adaha.

6.2 Wasiirka Maaliyaddu waxa uu qabanqaabinayaa, shaqaale u sameynayaa, uuna maamulayaa Wasaaradda Maaliyadda iyo Hay'adda Dakhli-ururinta waxaana uu soo saarayaa xeer-nidaamiyeyaal iyo amarro maamul oo la xiriira maamulka Miisaaniyadda Guud ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya iyo wax kasta oo kale oo la xiriira hawlaha Wasaaradda Maaliyadda iyo Hay'adda Dakhli-ururinta ee loo igmaday.

**Qodobka 7aad. Xisaabaadka Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya**

7.1 In [Baarlamaanku] uu si kale u go'aamiyo mooyee, sanad-maaliyadeedku waa sanad 12 bilood ka kooban, oo bilaabanaya kowda Jannaayo dhammanayana soddon iyo kowga Disembar ee sanad kasta..

7.2 Wasiirka Maaliyaddu waa in uu u furaa uuna u maamulaa xisaab banki oo mid ama ka badan ah si waafaqsan dhammaan xeer-nidaamiyeyaasha iyo amarrada (tilmaamaha) la xiriira ka shaqeysiinta xisaabaha bankiyada, kuwaas oo lagu soo saarey awoodda uu siinayo Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha/Maamulka (2017), si la jaanqaadeysa mabda'a ka shaqeysiinta Xisaabta Keliya ee Khasnadda/*Treasury Single Account* (TSA), si loo aqbalo, loo kaydiyo, loona bixiyo wixii lacag ah ee dakhli ahaan loo dhaliyo ama si kale loo helo ee la xiriira Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

7.3 Lacagaha la qaado (dakhli ahaan loo dhaliyo) ama si kale loo helo waa in ay qayb ka noqdaan Sanduuqa Maaliyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waana in lagu shubaa xisaabta [bangiga] ee lagu furay qaab waafaqsan Qodobka 7.2 iyada oo ah Xisaabta Keliya ee Khasnadda.

7.4 Kharash lagama bixin karo Xisaabta Keliya ee Khasnadda ee Sanduuqa Maaliyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya marka laga reebo kharashaadka ku jira Miisaaniyadda oo hab [Xeer Qoondeyn oo Baarlamaani] ah uu ku soo saarey Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

**Qodobka 8. Hantidhowr Madax-bannaan**

Madaxweynaha Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in uu hubiyaa in hantidhowr madax-bannaan oo u habboon loo sameeyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya. Hantidhowrka Madax-bannaan waa in uu warbixinnadiisa u soo gudbiyaa [Baarlamaanka] Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

**Qodobka 9aad. Siyaasadda Shaqaalaha iyo Shaqaaleynta**

Wasiirka Maaliyadda waa in uu dhaqangeliyaa siyaasado shaqaale oo aan takoor ku dhisneyn oo waafaqsan dhabbe-tuseyaasha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

**Qodobka 10aad. Hirgelinta**

Wasiirka Maaliyadda waxaa uu soo saari karaa [xeer-nidaamiyeyaal iyo tilmaamo/amarro maamul] oo la xiriira hirgelinta [Xeerkan Baarlamaanka].

**Qodobka 11aad. Dhaqangalka**

[Xeerkan Baarlamaanka] waxaa uu dhaqangeliyaa DD/MM/YYY.

Baarlamaanka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya

JamhuuriyadaFederalkaSoomaaliya

**DowladGoboleedkaHirshabeelle**
**XafiiskaMadaxweynaha**

**Federal Republic of Somalia**
**Hirshabelle State**
**Office of the President**

**Ref: DGHSH/XMM/N/0121/18** **Tr: 19/03/2018**

## XEER MADAXWEYNE Lr 121

Madaxweynaha Dowlad goboleedka hirshabeele markii uu arkay qodobka 51aad farqadiisa 12aad ee dastuurka dowlad goboleedka Hirshabeele.

Markii uu arkay baahida loo qabo in la helo sharciyo iyo xeerar lagu Maareeyo Maaliyadda Dadweynaha, xeer daqli iyo xeernidaamiyeyaashiisa, iyo in la helo xeer lagu dhiso Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowlad goboleedka Hirshabeele.

Markii uu arkay qaraarka baarlamaanka uu soo saaray 18/02/2018 ee uu tirsigiisa yahay **GSHDDGHSH/003/18** ee ku aadaanaa ansixinta sharciga Dakhliga iyo xeernidaamiyeyaasha 9aad 2018 iyo kan kale ee la soo saaray isla taariikhdaas ee uu tirsagiisa yahay **GSHDDGHSH/004/18** ee ku aadan ansixinta sharciga lagu dhisayo wasaaradda maaliyadda 2018 iyo sharciga kale ee lagu ansixiyey sharciga maareynta Maaliyadda Dadweynaha 2018 oo isna tirsigiisa yahay **GSHDDGHSH/005/18** ee la soo saaray taariikh 05/03/2018.

Madaxweynaha dowlad goboleedka hirshabeele waxa uu xeeriyey in qaraarada baarlamaanka ee

1. Sharciga Dakhliga Iyo Xeernidaamiyeyaasha 9aad 2018
2. Sharciga Lagu Dhisayo Wasaaradda Maaliyadda 2018
3. Sharciga Maareynta Maaliyadda Dadweynaha 2018

loo bedelo xeer madaxweyne maanta oo ay taariikhda tahay 19/03/2018
xeer lamber 121

Maxamed Cabdi Waare
Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeele

Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Hirshabeelle
Xafiiska Madaxweyne Ku xigeenka

جمهو ريةالصوما لالفيد را لية
حكومة اقليم هر سبيلي
مكتب نائب الرئيس

**Federal Republic of Somalia**
**Hirshabelle State**
Office of the Vice President

**Ref: DGHSH/XMKX/0018/018** **Tr: 06/02/2018**

**Ku: Guddoonka Baarlamaanka Dowlad G. Hirshabeelle** **"Jowhar"**

**Og: Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeelle** **"Jowhar"**

**Ujeeddo: Codsi "Ansaxin Hindise Sharciyeedyo dhowr ah"**

Mudane Guddoomiye,

Waxaan si xushmad leh idinkaga codsanaynaa in la ansaxiyo Hindise Sharciyada hoos ku qoran kuwaas oo Wasiirka Maaliyada iyo Horumarinta Dhaqaalaha uu soo hordhigay Kalfadhiga Golaha Wasiirada DGHSH taarikhdu markay ahayd **05/02/2018**.

1- Xeerka lagu dhisyo Wasaarada Maaliyada & Horumarinta Dhaqaalaha
2- Xeerka Dhakhliga
3- Xeerka Maareynta Maamulka Maaliyad/dadweynaha

Golaha Wasiirada Dowlad Goboleedka Hirshabeelle waxay cod aqlabiyad leh ku ogolaadeen isla taariikhda aan soo sheegnay "Hindise Sharciyeedyada kor ku xusan".

Haddaba anagoo tixgelinayna horumarinta nidaamka Dowliga ah iyo dardar gelinta shaqooyinka kala duwan ee looga fadhiyo Dowlad Goboleedka Hirshabeelle, waxaan Guddoonka Baarlamaanka DGHSH ka codsanaynaa in la horgeeyo Golaha barlamaanka Hindise sharicyeedaas si loo ansaxiyo.

Mahadsandiin

Mudane Cali C/laahi Xuseen (Cali guudlaawe)

Madaxweyne ku xigeenka Dowlad Goboleedka Hirshabeelle

XAFIISKA MADAXWEYNE KU XIGEENKA DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABEELLE
مكتب نائب الرئيس
OFFICE OF THE VICE PRESIDENT

**Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya**
**Dowlad Goboleedka Hirshabelle**
**Xafiiska Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad Goboledka Hirshabeelle**

جمهورية الصومال الفيدرالية
ولايةاقليم هرشبيلي
مكتب رئيس مجلس االنواب هرشبيلي

**Federal Republic of Somalia**
**Hirshabelle State**
**Office of the speaker**

Ref: XGBDGHSH / 120/18: الرقم

Jowhar, 05th March 2018 التاريخ

**Ku: Madaxweynaha Dowlad Goboledka Hirshabelle** =Jowhar=

**OG: Madaxweyne Kuxigenka Dowlad Goboledka Hirshabelle** =Jowhar=

**OG: Wasiirka Maaliyada Dowlad Goboledka Hirshabelle** =Jowhar=

**OG:Guddiga Maaliyada Qorsheynta iyo tirakoobka BDGHSH** =Jowhar=

**OG:Xoghayaha Guud ee Golaha Sharci Dejeinta Hirshabelle** =Jowhar=

**Ujeedo ;-Qaraarka Baarlamanka ee Anxisinta Sharciga lagu Dhisayo Wasarada Maaliyada 2018**

**Mudane Madaxweyne**

Waxaan halkaan kugu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Sharci Dejinta **Lr. GSHDDGHSH/004/18** ee **18-02-2018** oo Golaha Sharci Dejinta Dowlad Goboledka Hirshabelle go'aan kagaaray **Ansixinta Sharciga lagu dhisayo Wasaarada Maaliyada 2018** oo halkaan ku lifaaqan isagoo Go'aamiyey qodobada Soo Socda

**Qodobka 1aad**

Ayadoo ay Goob joog yihiin Golaha **52** Xildhibaan Kalfadhigii 3aad fadhigiisa 11-aad ee 18-02-2018 wuxuu codeyn wadar oggol ah ku ansixiyey **Sharciga lagu dhisayo Wasaarada Maaliyada 2018** si ay u fududaato Qorshe Hawleedka Xukuumada ee ku aadan Wasaaradan

**Qodobka 2aad**

Hadaba Waxaan Mudane Madaxweyne Kugu wargelinayaa inaad Xeer Madaxweyne kusoo saarto **Sharciga lagu dhisayo Wasarada Maaliyada ee la ansixiyey sanadka 2018** Si Waafaqsan qodobka 51aad Faqrada 12aad Dastuurka DGHSH Laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dowlad Goboledka Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 43aad Faqrada 1aad si uu u noqoto Sharci dhaqan gal ah

**Sheikh Osman Barre Mohamed**

**Gudomiyaha Golaha Sharci Dejinta Dowlada Goboleedka Hirshabelle**

DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABEELLE XAFIISKA GUDDOOMIYAHA BAARLAMAANKA HIRSHABEELLE ولاية اقليم هرشبيلي مكتب رئيس مجلس النواب هرشبيلي OFFICE OF THE SPEAKER F.R.S HIRSHABELLE STATE

E-mail: office.speaker@hirshabellestate.so | Mobile: +252615564141, +252615611016

Tix/GSHDDGHSH/004/18 18ta febrayo 2018

Qaraarka Golaha Sharcidejinta DGHSH

Kalfadhiga 3aad Kulankiisa 11aad.

# DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABELLE.

# GOLAHA SHARCI DEJINTA DOWLAD GOBOLEEDKA HIRHSABELLE

# QARAAR KUSAABSAN

# Ansixinta Sharciga lagu dhisay Wasaarada Maaliyada

**JOWHAR 18,FEBRAYO,2018**

## Qaraarka Golaha sharci Dejinta Hirshabelle

### Baarlamanka Dowlad Goboledka Hirshabelle

**Markuu arkay:** Warqada Codsiga Madaxweyne kuxigenka Dowlad Goboledka Hirshabelle tirsigeedu yahay DGHSH/XMKX/0018/018 ee 06/02/2018 oo kusaabsan in la ansixiyo Hindise sharciyedka Magaciisu kor kuxusan si ay u fududaato fulinta Qorshe Howledka xukuumada

**Markuu arkay:** Qodobka 33aad ee Xeer hoosadka Golaha sharci Dejinta kuna saabsan Habraaca Ansixinta Hindise Sharciyedka

**Markuu Dhageystay :** Warbixinta Guddiga Maaliyada Qorsheynta iyo tirakoobka oo kusaabsaneyd falanqeynta Hindise sharciyedkan oo ku taariikhsan 18-02-2018

**. GOLUHU WUXUU GUDDOONSADAY QODDOBADA HOOS KUXUSAN;**

**Qodobka 1aad**

Si waafaqsan Qodobka 33aad ee xeer hoosaadka Golaha sharci Dejinta oo xeerinayo Habraaca Ansixinta Sharciyada

Golaha Sharci Dejinta Kalfadhigii 3aad kulankiisa 11aad ee 18ka febrayo 2018 oo ay goobjoog yihiin **52** Xildhibaan codeynaya waxay Hindise sharciyedka xeerka Lagu dhisayo Wasaarada Maaliyada ku ansixiyeen Cod furan:

| | |
|---|---|
| Oggol: | 49 (afartan iyo sagaal Xildhibaan) |
| Diiday: | 2 ( Labo Xildhibaan) |
| Ka Aamustay: | 1 (Hal Xildhibaan ) |

**JOWHAR 18,FEBRAYO,2018**

**Qodobka 2aad**

**Meel Marinta Sharciga lagu dhisayo Wasaarada Maaliyada**

**Qaraarka Golaha oo ay kulifaaqan yihiin Dhamaan Dokumentiga kor kuxusan oo ah qayb qaraarkan kamida waxaa lagu soo saaraya xeer Madaxweyne Dowlad Goboledka Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 51aad Faqrada 12aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabelle waxaana lagu soo saaraya faafinta Rasmiga ah ee Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 43aad Faqrada 1aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabelle**

**M.ne Sh. Cusmaan Bare Maxamed**

**Gudoomiyaha Golaha Sharci Dejinta DGHSH.**

-------------------------------

DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABEELLE
XAFIISKA GUDDOOMIYAHA BARLAMAANKA HIRSHABEELLE
ولاية اقليم هر شبيلي
مكتب رئيس مجلس النواب هرشبيلي
OFFICE OF THE SPEAKER
F R S ★ HIRSHABELLE STATE

## Lifaaqyada:

- **Codsiga Madaxweyne Kuxigenka Dowlad Goboledka Hirshabelle Lr. DGHSH/XMKX/0018/018 ee 06-02-2018**
- **Warbixinta Guddiga Maaliyada Qorsheynta Tirakoobka 18-02-2018**

**JOWHAR 18,FEBRAYO,2018**

**Ansixinta Hindise Sharciyedka Xeerka Dhismaha Wasaarada Maliyada oo uu soo Gudbiyey Wasiirka Maaliyada**

| **Guddoomiyaha Golaha Sharci Dejinta Dowlad Goboledka Hirshabelle** | |
|---|---|
| Tirada Xubnahada Codeysay 52: Oggol(49) Diidmo(2) Ka aamustay(1) | |
| **Guddoomiyaha Golaha Sharci Dejinta**<br><br>Saxiixa Md.ne Sheikh Cusmaan Barre Mohamed | Taariikh 18th Febraury 2018 |

**JOWHAR 18,FEBRAYO,2018**